

## Tallo Soo Jeedin ku saabsan adeegyada goobaha Bari iyo Bartamaha (TNS)

### Goobta Bariga iyo Bartamaha:

Castle, Evington, Knighton, Waqooyiga Evington, Spinney Hills, Stoneygate, Wycliffe



### Muuqaalka Guud ee Wadatashiga

Gollaha Magaalada Leicester waxa uu dib u qaabeyn ku sameynayaa adeegyada uu ka bixiyo xaafadaha magaalada. Kuwan waxaa ku jira maktabadaha, xaruumada bulshada iyo dhallinyarada iyo xafiisyada guriyeynta.

Dowladda oo in badan ka jartey maalgelinta micnaheedu waa in aanan adeeg bixinta u sii wadi karin sida ay hadda tahay. Laakiin ka hor inta aanan wax tallo ah soo jeedin, waxa aan Janwari iyo Feberwari 2017 la hadalney dadka degan goobaha waqooyi bari ee magaalada si aan u ogaano waxa ay adeegyadooda ka rabaan. Waxaa kale oo aan weydiiney tallo soo jeedin mustaqbalka ku saabsan.

### Maxay tahay sababta aan wadatashiga u sameyneyno

Waddadii horey loogu socon lahaa baan hadda diyaariyey waxaana rabi laheyn in aan ogaano fikradaha aad ka qabto. Tallo soo jeedintan waa mid adeegyada isku keeneysa kharashna badbaadineysaa.

Waxaan diyaariney labo dhacdo oo tallo soo jeedintan looga wadahadlayo gooraha ah:

- Arbaco 5 Juulay, 6.30 – 8 fiidnimo goobtuna waa xarruunta Coleman Neighbourhood Centre
- Talaado 11 Juulay 6.30 – 8 fiidnimo goobtuna waa xarruunta St Matthews Centre

Fadlan kaalay, ama fikradahaaga halka hoose ku soo dhiibo.

## Wax bedelaadyo tallo ahaan loo soo jeedinayo

### Xarruunta St Matthews Centre

- Xarruuntan waxa ay bixisaa adeegyo tirro ah kana mid yihiin maktabad, xarruun dhallinyaro iyo miis hore oo guriyeynta qaabilsan iyo adeeg uu qofka qabsado oo uu adeegyada Gollaha wax uga helo
- Maalgeli xarruunta si hawsha qurxinta loo dhameystiro loona abuuro qolal saa'id ah oo macaamiisha guriyeynta lagu wareysto
- Dhiib goob hoy u noqota Xafiiska Guriyeynta Xaafadda St Peters oo ka mid ah guri siinta jirta

### Xarruunta African Caribbean Centre

- Dhismaha sii hey
- Sahmi siyaabaha loo yareyn karo kharashka xarruunta ku baxa lana shaqee kuwa daneeya iyo kuwa iskhaashi ahaan ku lamaanan

### Maktabada Highfields Library

- Maktabada sii hey
- Dib u qurxi maktabada oo qalabka iyo waxyaabaha dhismaha dhex yaal sii hagaaji
- U samee goobo musqulo (WC) dadweyne ah

### Xafiiska guriyeynta ee Xaafada St Peters Neighbourhood

- Adeegyada u soo rar gudaha Xarruunta la hagaajiyey ee St Matthews Centre ah
- Xafiiska guriyeynta wax ka bedel oo guriyeyn saa'id ah ka yeel

### Maktabada Knighton Library

- Maktabada sii hey
- Maktabada ku rakib fure fob ah si ay kooxada bulshada u isticmaalaan saacadaha kuwa shaqada ka baxsan

### Maktabada St Barnabas Library

- Maktabada sii hey
- Xafiisyada guriyeynta ee xaafadaha Humberstone iyo Rowlatts Hill ee adeegyada xagga hore ku wajahan u soo rar gudaha dhismaha maktabada St Barnabas Library
- Ku rakib qalab uu qofka iskiis u isticmaali karo si loo sii hagaajiyo wax ka helitaanka adeegyada Gollaha

### Xarruunta Bulshada ee Coleman Lodge Community Centre

- Sahmi wadooyinka la kala dooran karo ee dhismaha lagu khaarijin karo ayna ka mid yihiin iibis, ijaaris ama dumis
- Kooxaha kala shaqee tilmaansiga goobta ugu fiican ee baahidooda haqabtiri karta

### **Xafiiska Guriyerynta ee xaafadda Humberstone Neighbourhood**

- Adeegyada u rar gudaha dhismaha maktabada St Barnabas Library ee la sii hagaajiyey
- Sahmi wadooyinka la kala dooran karo ee dhismaha khaarijin karo ayna ka mid yihiin ijaaris ama iibis

### **Xarruunta Xaafada Coleman Neighbourhood**

- Xarruunta iyo goobta qoob-ka-ciyaarka iyo xafladaha sii hey
- Kooxaha kala shaqee sidii isticmaalka/adeegsiga dhismaha loo sii kordhin lahaa
- Xafiiska Guriyeynta Xaafada Rowlatts Hill Neighbourhood
- Adeegyada u soo rar gudaha maktabada St Barnabas Library ee la sii hagaajiyey
- Sahmi wadooyinka la kala dooran karo ee dhismaha lagu khaarijin karo ayna ka mid yihiin ijaaris, iibis ama baneynta goobta si ay u noqoto meel guriyeyn ahaan loo sii horemarin karo

### **Maktabada Evington Library**

- Maktabada sii hey
- Maktabada ku rakib fure fob ah si ay kooxada bulshada u isticmaalaan saacadaha kuwa shaqada ka baxsan

Xusuusnow: Haddii uu hab-nidaameedkan wadatashiga ah tilmaamo jiritaanka fursado dheeraad ah, waxaa dhici karta in aan ka fikirno dhismooyin kale oo uu Gollaha /Kownsalka ku leeyahay gudaha goobaha bari iyo bartamaha.

### **Isticmaalka adeegyada**

1. Waa kuwee adeegyada xaafada ee goobtaada laga helo ee aad isticmaasho? (fadlan sax mid walba oo kuwa aad isticmaasho ka mid ah)

(Waa loo baahan yahay)

Waxbarashada dadka waaweyn

Maktabad

Qol Ijaarasho

Xarruun dhallinyaro

STAR

Xafiis guriyeyn

Hawlaha bulshada (sida cunto karinta, farshaxanka, qoob-ka-ciyaarka)

Maya, ma isticmaali wax adeegyadan ka mid ah

Adeegyo kale (fadlan sheeg)

Adeegyada kale ee aad isticmaashey:

--

2. Waa kuwee xarruumaha aad isticmaasho? (fadlan sax kuwa aad isticmaasho oo idil inta ay tirradooda tahayba)

- Xarruunta St Matthews Centre
- Xarruunta African Caribbean Centre
- Xarruunta xaafada Coleman Neighbourhood
- Maktabada Highfields Library
- Xarruunta bulshada ee Coleman Lodge Community Centre
- Maktabada Knighton Library
- Xafiiska Guriyeynta ee xaafada St Peters Neighbourhood
- Maktabada St Barnabas Library
- Xafiiska Guriyeynta ee xaafada Humberstone Neighbourhood
- Maktabada Evington Library
- Xafiiska Guriyeynta ee xaafada Rowlatts Hill Neighbourhood

**Boost Koodh**

3. Waa maxay boost koodhka gurigaaga?

**Fikradaha aad tallo soo jeedinta ka qabto**

4. Sidee bay tallo soo jeedintan wax kuugu faa'ideyn laheyd?

5. Ma jiraan wax tallo soo jeedintan ku jira oo kaa joojinaya isticmaalka adeegyada xaafada? Haddii ay haa tahay, fadlan sheeg sababta (sababaha).

6. Ma heysaa wax fikrado kale ah oo aad dhiibaneysa?

### **Noo sheeg wax kugu saabsan**

7. Da'daada?

---

In aanan sheegin baan door-bidayaa

8. Jinsi. Ma waxaa tahay...

Lab

Dhedig

In aanan sheegin baan door-bidayaa

9. Isir ahaan qoladeed isku tilmaami laheyd?

---

In aanan sheegin baan door-bidayaa

10. Ma isku heysataa in aad qabto wax laxaad li'l ah ama aad xaalad caafimaad qabto?

- Haa
- Maya
- In aanan sheegin baan door-bidayaa

Haddii ay jawaabta su'aasha kore HAA tahay, fadlan sheeg sida ay laxaad li'idaadaas ama xaaladaadaas caafimaad wax u yeesho awooda aad u leedahay wax ka helidda adeegyada goobtaada laga helo.

---

---

11. Nooca reerka guriga:

- Labo wada joogta oo aan carruur laheyn
- Labo wada joogta oo carruur leh
- Waayeel hawl-gab ah
- Waalid keligiis ilmo heysta
- Qof keligiis ah oo aan ilmo laheyn
- In aanan sheegin baan door-bidayaa

Macluumaadka aad qeybtan ku sheegto waxaa loo keydin doonaa si waafaqsan sida ku qeexan Xeerka Badbaadinta Daataha (the Data Protection Act) ee 1998 waxaana loo isticmaali doonaa oo keliyah muraadka si wax qiimeyn leh wax ula socodka ah. Faahfaahintaada looma sii gudbin doono shakhsi kale, urur ama koox kale. Gollaha Magaalada Leicester waa xukumaha daataha macluumaadka boggan ku qoran marka laga hadlayo arrimaha Xeerka Badbaadinta Daataha.

Fadlan foomkan u dhiib mid ka mid ah goobaha Gollaha Magaalada Leicester leeyahay sida maktabad, xarruun bulsho, xarruun dhallinyaro ama mid tamashle, ama xafiis guriyeyn amase boostaha ugu soo dir kuna soo hagaaji: **Transforming Neighbourhood Services, Room 2.23 Town Hall, Town Hall Square, Leicester LE1 9BG. Taariikhda ay xirmeyso waa 25 Juulay 2017**

**leicester.gov.uk/tns**